

Lehrplan Volksschule Kanton St.Gallen



Maxay ku dabaqan tahay hadda?



**Kanton St.Gallen
Bildungsdepartement**



Waalidiinta Qaaling ah

Ma og tihiin weli, waxa aad ku soo barateen dugsiga? Carruurtiinana ka warama? Manhajka wuxuu qeexaya, waxa ardayda u bahaanyihiin inay ogaadaan iyo wax in ay awood u yeeshaan ay tahay markii ay dhameeyaan dugsiga.

Intuu isbeddel ka dhaco, manhajka dugsiga aasaasiga ah waa la cusboonaysiiyaa waqti ka waqti. Sheeyo cusub – tusaale ahaan shaqooyinka la isticmaalayo kombiyuurtarrada – ayaa la baran doonaa. Sidaa darteed waxaa jira manhaj cusub laga billaabo sannadkani. Canuggaaga wuxuu baran doonaa, waxa ay u baahan tahay inuu wanaagsanaado bilowgiisa nololsha shaqo ama dugsiga sare.

Iskaashiga waalidiinta oo guul ah, dugsiyada iyo mas'uuliyiintaba guul laga gaaro, carruurta iyo dhallinyarada ku nool gobolka Canton St. Gallen waxay helayaan waxbarasho fiican.



« Manhajka dugsiga aasaasiga ah wuxuu u horseedayaa carruurteena inay si fiican ugu diyaar garoobaan inay si fiican ula qabsadaan waxyaabaha looga baahan yahay bulshada maanta »

Wey wanaagsan tahay in la ogaado

Inta badan Carruurtaada iyo dhallinyaradiina badankooda wax bay barten ilaa hadda waana la bari doonaa mustaqbalka. Weli wuu shaqaynayaa waana muhiim. Laakiin waxaa sidoo kale jira isbeddel dhowr ah:

- **Maadooyinka:** Maadooyin cusub ayaa lagu darayaa ama magaca laga beddelayaa. Fasalka 5aad ee dugsiiga aasaasiga ah canuggaaga wuxuu ku baranayaa tusaale ahaan maadada cusub ee «cilmiga warbaahinta iyo komibutarrada».
- **Inta lagu jiro fasalka qoraalka:** Canuggaaga wuxuu hadda baranayaa «Deutschschweizer Basisschrift» (Engl. Qoraal aasaasi ah oo isugu jira luuqadda Jarmalka iyo Swiss-ka) waa qoraal far gacameed oo gaar ah mana ku jiraan fartii waaweyneed iyo qoraal dugsiyeedkii hore ee Swiss-ka. Fasalka 3aad ee dugsiiga aasaasiga ah ardayda waxay ku fahmayaan sida kombiyuutarka wax loogu qoro.

- **Shaqo guri:** Canuggaaga wuxuu ku tababar qaadanayaa guriga isagoo wata shaqadiisa guri casharrada lagu soo baray dugsiiga. Waxay dariishad kaa tusayaan oo wax kaaga sheegayaan dugsiiga waxay na aragti kaa siinayaan casharrada canuggaaga. Dugsiiga Hoose ma jiro wax shaqo guri ah laga billaabo Jimcaha ilaa Isniinta.
- **Warbixinta dugsiiga:** Foomamka iyo qariiradda warbixinta waxaa loo hagaajiyay qaab cusub. Fasalka 2aad dugsiiga aasaasiga ah canuggaaga wuxuu helayaa warbixin la qiimeeyay teeram walba dhammaadkiisa. Macalimiinta sidoo kale waxay kuugu yeerayaan wadasheekaysi qiimeyn ah sannad walba.

Eeg manhajka

Waqtiga la billaabayo dugsiiga – fasalka ugu hoose ee naasariga laga billaabayo – canuggaaga wuxuu ku baranayaa hab isugu jira ciyaar iyo duruus qaadasho. Dugsiiga aasaasiga ah iyo dugsiiga sare waxa dugsiiga la isku barayo waxaa loo qaybiyaa maadooyin kala duwan.

1. Zyklus KG und 1./2. Klasse Primarschule	2. Zyklus 3.–6. Klasse Primarschule	3. Zyklus 1.–3. Oberstufe
Deutsch		
Englisch		
Französisch		
Mathematik		
Natur, Mensch, Gesellschaft		Natur und Technik
Wirtschaft, Arbeit, Haushalt		
Räume, Zeiten, Gesellschaften		
Ethik, Religionen, Gemeinschaft Schule Ethik, Religionen, Gemeinschaft Kirchen		
Gestalten (Bildnerisches Gestalten / Textiles und Technisches Gestalten)		
Musik		
Bewegung und Sport		
Medien und Informatik		
Berufliche Orientierung		

Waqtigee ayaa looga baahan yahay canuggaaga inuu dugsiiga joogo maalmahee ayaana lagu qeexay jadwalka. Waxaad ka helaysaa dugsiiga canuggaaga.

Canuggaaga qaabkan ayuu wax ku baranayaa

Canuggaaga wuxuu kula kulmayaa mawduucyo kala duwan dugsiiga wuxuuna ballaarinayaa aqoontiisa. Waxay baranaysaa xirfado iyo karti kala duwan sida qoraalka ama aasaaska xisaabta.

eCanuggaaga waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu ka faa'iidaysto waxa uu bartay. Tusaale ahaan dugsiiga waxaa lagu baranayaa waxyaabo ku saabsan cimilada. Marka la qorshaynayo fasax dalxiiseedka dugsiiga ardayda si wax ku ool ah ayay uga faaidaystaan waxa ay barten iyagoo garanaya maalinta la filayo cimilada ugu wanaagsan.

Isagoo mar walba ka faa'iideysana canuggaaga waxa uu bartay, canuggaaga wuxuu noqonayaa mid aamin ah uguna faaidaysta aqoontiisa si kalsoon ka buuxdo. Marka la baranayo mawduucyo cusub wuxuu waxaxay ka faa'iideysanaysaa wixii uu hore u soo bartay. Canuggaaga wuxuu noqonayaa mid awood xirfadeed leh.

Maacalimiinta waxay ku taageerayaan dugsiiga gudihiisa qaabab kala duwan carruurtaada iyo dhallinyartaada. Waxay istimaalayaan qalabka waxbarida. Xiriirka wanaagsan ee ay la leeyihiin canuggaaga iyo khibrada aqoontooda, waxay hubinayaan in ardayda ay si wanaagsan u baranayaan ay na dhiiran yihiin oo ay niyad wanaagsan yihiin.

« Marka wax la baranayo aqoontii hore ayaa la adeegsadaa si hor loogu socdo »

Macluumaad dheeraad ah

- Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad kala xiriiri kartaa macalimiinta canuggaaga.
- Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan manhajka dugsiyada hoose waxaa laga heli karaa www.lehrplan.sg.ch